# REPUBLIC OF SOMALILAND

## Maxkamadda Dastuurka

## Constitutional Court

**MS/DD/01/2015** **Date: 23/07/2015**

**Maxkamadda Dastuuriga oo ka kooban:**

1. **Adam Xaaji Cali Axmed** **Guddoomiye**
2. **Cabdiqaadir Axmed Maxamuud** **Xubin**
3. **Maxamed Cumar Geele** **Xubin**
4. **Cabdiraxmaan Madar Caraale** **Xubin**
5. **Yaasiin Xasan Ismaaciil** **Xubin**

Maxkamadda Dastuurka ee Jamhuuriyada Somaliland

**Markay Aragtay** Qodobka 98(1)(J)[1] iyo 101aad[2] ee Dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markay Aragtay** Cabashada ay usoo qorteen labada Xisbi Mucaarid ee 'Xisbiga Cadaalada iyo Daryeelka ee UCID iyo Xisbiga WADDANI' kuna taariikhaysan 22/07/2015,

**Markay Aragtay** Jawaab celinta ay soo gudbiyeen cidda laga cabanaayey oo ah Wasaaradda Daakhiliga iyo Taliska Booliska kuna taariikhaysan 22/07/2015,

**Markay Aragtay** kalsoonida ay dhinacyadu siiyeen Maxkamadda Distuurka ah, waxay soo saartay qaraarkan:

**<u>QARAARKA MAXKAMADDA</u>**

1. In axsaabta mucaaridka ee UCID iyo WADDANI ay xaq u leeyihiin in ay qabsadaan shirarka uu siinaayo distuurka jamhuuriyadda Somaliland, xeerka nidaamka ururada

---

[1] Qodobka 98(1) ee Dastuurka:

1. Garsoorku waxa uu awood gaar ah u leeyahay:
   b. In uu fasiro micnaha xeerarka ka soo baxa Golayaasha dastuuriga ah iyo xeerarka degdegga ah iyada oo la raacayo Dastuurka.
   t. Inuu ka garsooro khilaafka ka dhex abuurma laamaha Dawladda oo dhinac ah iyo xubno ka tirsan dadweynaha oo dhinac ah ama dadweynaha dhexdooda.
   j. Inuu ka taliyo muran kasta oo Ia xidhiidha waafaqsanaanta Dastuurka.

[2] Qodobka 101aad ee Dastuurka:
MAXKAMADDA SARE
Maxamadda Sare waa hay'adda ugu sarraysa Garsoorka; isla markaana waxay tahay Maxamadda Dastuurka. Tirada garsoorayaashu waa inaanay ka yaraan Guddoomiyaha iyo afar garsoore; waxaana nidaaminaya xeer gaar ah.

iyo axsaabta siyaasada iyo xeerarka kale ee qaranka Somaliland, gaar ahaan qodobada 22aad[3], 23(3)aad[4] iyo 32(1)(2)[5] ee distuurka qaranka. Waxa kale ooo waajib ku ah wasaaradda arrimaha gudaha, booliiska iyo hay'adaha kale ee qaranka in ay ixtiraamaan isla markaana aanay ka horjoogsan xuquuqda distuuriga ee ay leeyihiin axsaabta mucaaridka iyo muwaadiniinta kale ee si waafaqsan distuurka jamhuuriyada Somaliland iyo xeerarka kale ee dalka u yaala.

2. Dhinaca kale wixii ka danbeeyey Aftidii Dastuurka ee 2001, sida uu dhigayo qodobada 9(1)aad[6] iyo 130(1)aad[7] ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland waxa laga soo guuray nidaamkii beelaha, waxaana loo soo guuray nidaam ku salaysan distuurka iyo axsaabta badan, waxaana jira Golayaal Qaran (Xeer Dajinta, Fulin iyo Garsoor) oo dhaqan gal ah, kana jawaabaya baahida qaranka ee hadba taagan si waafaqsan distuurka. Waxa hadaba xaaraan ah isla markaana aan sharci ahayn in cidnaba (haday tahay qabiil, ururo siyaasadeed iyo cid kale toona) ku baaqdo "Shir Qaran" ama "Shir-aayo-ka-tashi Qaran" oo aanay golayaasha qaranka ee distuuriga ahi hogaaminaynin si waafaqsan distuurka iyo xeerarka dalka u yaala.

3. Dhinaca kale Maxkamadda Dastuuriga ahi iyada oo og in murankan taagani uu salka ku hayo qabashada doorashada soo socota, waxa ay amraysaa dhamaan dhinacyada siyaasada iyo hay'adaha ay khusayso ee distuuriga ah inay sida ugu dhakhsaha badan u soo afjaraan muranka ku saabsan doorashada soo socota isla markaana xal ka gaadhaan si loogu diyaar-garoobo doorasho xor oo xalaal ah.

4. Maxkamadda distuuriga ahi waxay ku amraysaa dhinacyada siyaasadu inay ilaaliyaan xeerarka iyo xeer hoosaadada dalka ee la xidhiidha akhlaaqada wanaagsan (good ethics) xiliga doorashada iyo xiliyada kaleba.

5. Qaraarkan waxa lagu dhawaaqay maanta oo ay taariikhdu tahay 23/07/2015.

---

[3] Qodobka 22aad ee Dastuurka:

XUQUUQDA SIYAASADEED, DHAQAALE, BULSHO IYO XAQA DOORASHADA

1. Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qayb galo hawlaha siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo hiddaha si waafaqsan xeerarka iyo Dastuurka.
2. Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha xeerku tilmaamayo wuxuu xaq u Ieeyahay in la doorto, waxna uu doorto.

[4] Qodobka 23(3) ee Dastuurka: Muwaadiniintu waxay xor u yihiin in ay isu habeeyaan ururro siyaasadeed, cilmiyeed, dhaqameed, bulsheed, xirfadeed, ama kuwa shaqaale si waafaqsan xeerka.

[5] Qodobka 32(1) & (2) ee Dastuurka:

XORRIYADDA BANNAANBAXA, RA'YI - DHIIBASHADA, SAXAAFADDA IYO WARBAHINTA KALE

1. Muwaadin kasta waxa uu xor u yahay in uu ra'yigiisa ku bandhigo qoraal, hadal, muuqaal, suugaan ama qaab kale oo xeerka waafaqsan.
2. Muwaadin kasta wuxuu xor u yahay inuu abaabulo kana qayb qaato, kulan ama bannaan-bax nabadeed oo xeerka waafaqsan.

[6] Qodobka 99(1) ee Dastuurka:

NIDAAMKA SIYMSADEED

1. Nidaamka siyaasadeed ee Jamhuuriyadda Somaliland waxa saldhig u ah nabad, talo-wadaag, dimuqraadiyad iyo hannaanka xisbiyada badan.

[7] Qodobka 130(1) ee Dastuurka: Dhaqan-gelinta Dastuurku waxay ka bilaabmaysaa marka afti loo qaado, natiijada aftiduna soo baxdo, waxana si ku meel gaadha loogu dhaqmi karaa muddo saddex sannadood gudahood ah oo ka bilaabmaysa taariikhdii uu oggolaaday shirweynihii 3aad ee Beelaha Somaliland.

| | |
|---|---|
| 1. Adam Xaaji Cali Axmed | Guddoomiye |
| 2. Cabdiqaadir Axmed Maxamuud | Xubin |
| 3. Maxamed Cumar Geele | Xubin |
| 4. Cabdiraxmaan Madar Caraale | Xubin |
| 5. Yaasiin Xasan Ismaaciil | Xubin |